

# Daryeelka ilmaha iyo

## Caafimaadka ilmaha

XAASHIDA MACLUUMAADKA WAALIDKA



### Barashada sheekooyinka

Barashada Sheekooyinka waxay bixisaa habkii lagu qori lahaa ama lagu diiwaangelin lahaa barashada ilmaha. Intii la isticmaali lahaa nooca sixida-liiska ee waxa ilmuhu samayn karo ama aanu samayn karin, sheeko sheegida (sheekaynta) waxaa loo isticmaalaa in lagu muujiyo waxa gaarka u ah ee ilmuhu xiisaynayo wuxuuna muujiyaa waxa ku adkaa iyo waxa uu u qabtay si wax ku oolla oo macna u samaynaya carruurta, qoysaska iyo daryeellayaasha.

“Ilmuhu wuxuu noqdaa mawduuca laga hadlayo safarkiisa barashadana waxaa lagu sameeyaa sharaxaad waxa uu samaynayo, iyo weliba wuxuu dareemayo. Sheekadu waxay diirada saartaa waxay carruurta samayn karaan iyo waxa aanay samayn karin, sidaasina waxay muujisaa carruurta awoodooda, waxay xiiseeyaan iyo waxay baran karaan” (Ryan, Kate Jigsaw cadadka 41)

Diirada waxa la saaraa wixii wanaagsan ama qabsoomay. Ilmaha waxaa lagu aqoonsadaa laguna ixtiraamaa barte si firfircoon uga qaybgeli kara barashadiisa, kuwaas oo leh waxyaalla ay xiiseeyaan iyo dabeecada u gaara. Waxaa kaloo iyadana la aqoonsadaa sida ilmuhu u arko wuxuu samaynayo, diiwaangeliyey oo qiimeeyey. Barashada waxa loo aqoonsadaa loona fahmaa:

- inay ku kala duwan xaallada kala duwan
- si guud – lug ugu yeellanaya ilmaha oo dhan, maaha keliya awoodooda garasho
- in la xoojiyey marka daryeelluhu wax ka qabanayo waxa ilmuhu xiisaynayo
- hab la marayo
- Waxay wadajir u sameeyeen ilmaha iyo daryeelluhu.

Carruurta waxaa loo arkaa bartayal firfircoon kuwaas oo ay daryeellayaashu ku caawimaan waxbarashadooda waxna ka qabtaan waxa ilmuhu xiisaynayo. Isticmaalida Barashada Sheekooyinka waxay u ogolaataa daryeellayaasha inay qorsheeyaan waayo aragnimo diiradana saaraan ilmaha, taas oo ka timid hogaaminta waxayna ku salaysan tahay waxa ilmuhu xiisaynayo.

Ka warbixinta habka ilmuhu wax u barto, iyo natiijooyinka barashada:

- waxaa la isticmaalaa sheekooyin lagu sharxayo barashada ilmaha (sheekooyinka barashada)
- waxay ku lug leedahay la socodka iyo dhegaysiga muddo badan – raadinta ilmaha aragtidiisa
- waxay ku salaysan tahay la socodka iyo tarjumaada uu sameeyey daryeelluhu
- waxay xoojisaa dareenka ilmaha kuwa barashada ku fiican ahaan iyagoo shaqa wadaag la ah daryeellayaasha
- waxay caawimaan aqoonsiga waxyaallaha gaarka ah ee ilmuhu xiisaynayo, wuxuuna ka caawimaa daryeellayaashu inay yeeshaan khibrad dhisaysa waxyaallahaas la xiisaynayo. Daryeellayaashu waxay u abuuraa boortofoolyo (waxyaalla khaasa oo la isugeeyey) ilma walba, si gaara ayaana loogu sameeyaa sawiro, tusaale shaqada ilmuhu qabtay, sheekooyinka diiwaangashan waxyaalla uu gaara oo uu xiisaynayo, wixii ka hor yimid iyo wuxuu ilmuhu qabtay. Waxaa kaloo lagu dari karaa maqal iyo muuqaal.

Habkaan, Sheekooyin Barashadu waxay bixisaa isku xirnaan macne samaynaysa (buundo) oo u dhexaysa guriga iyo meesha lagu daryeellayo. Waalidiinta iyo xubnaha kale ee qoyska ayaana ogaada wixii dhacayey markuu ilmuhu joogay daryeelka. Buundadaan u dhexaysa guriga iyo arrinta daryeelluhu waa laba dhinac, waxayna u ogolaataa daryeellayaasha inay wax badan ka bartaan marka ilmuhu la joogo qoyska guriga.

***Xaashida xaqiiqda ee waalidka waxaa la hellaa iyadoo dhowr luqadood ku qoran waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Isku-xirka Ilmanimada-Hore (Early Childhood Connections) oo ah [www.econnections.com.au](http://www.econnections.com.au)***

DA'DAALKA



ROYAL CHILDREN'S HOSPITAL

WAXAA TAAGEERAY DEEQDA  
WAXBARASHADA KA TIMID



WAXAA KAALMEEYEEY GOLAHA  
AQOONSIGA DARYEELKA  
ILMAHA EE QARANKA



WAXAA TAAGEERAY



Australian Government  
Department of Families,  
Community Services and  
Indigenous Affairs